Macluumaad ku saabsan tallaalka ka hortagga hargabka ("ifilada") oo leh tallaal dooskiisa sareeyo oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 60 sano iyo ka weyn

(Xaaladda sida ay tahay laga bilaabo Oktoobar 2021)

Caabuqyada degdega ah ee ku dhaca marinnada hawada/cunnaha ayaa ka mid ah cudurrada ugu caansan waxaana sababa dhowr cudur-sidayaal oo kala duwan, gaar ahaan fayrasyada. Fayraska hargabka, oo ah sababaha "ifilada" dhabta ah, ayaa door muhiim ah ka ciyaara wuxuuna sanad kasta u soo laaban karaa qaab faafa/safmareen ah. Marka lala barbar dhigo cudur-sidayaasha kale ee sababa cudurrada neef-mareenka ku dhaca ee degdega ah, fayrasyada hargabka waxay sababaan xaalado cudureed oo aad u daran inta badan. Ka hortagga ugu fiican waa tallaalka oo lagu qaato waqti habboon. Tallaalka hargabku kaama difaaco cudurrada neef-mareenka guud ahaan fudud ee ay sababaan cudur-sidayaasha kale.
Hargabku waa jirro degdeg ah oo ay wehliyaan qandho, qufac iyo murqo xanuun aan laga sooci karin cudurrada kale ee neef-mareenka ku dhaca iyadoo la isticmaalayo sababo caafimaad oo kali ah. Bilaabashadu caadi ahaan waa kedis, wuxuuna cudurka ka soo bilowdaa xaalad caafimaad oo caadi ahaan fiican. Tiro dhowr ah oo kiisas caafimaad oo daran ayaa inta badan lagu arkay gaar ahaan dadka da'doodu ka weyn tahay 60 sano, kuwaas oo qaba cudurrada joogtada ah iyo haweenka uurka leh. Fayraska hargabka wuxuu aad u badan yahay wakhtiyada qabowga ee sanadka. Sidaa darteed guud ahaan tallaalka waa in la sameeyaa bilaha dayrta (sida ugu wanaagsan Oktoobar/Noofembar). Si kastaba ha ahaatee, tallaalka kahortagga ah ayaa la samayn karaa wakhti kasta.

Tallaalka

Fayrasyada hargabku si joogto ah ayey isu beddelaan, sidaa darteed qaadashada tallaalka hargabku waa in sannad kasta lagu celiyaa iyadoo la isticmaalayo tallaalka markaas socda. Waxa loogu yeero tallaallada xilliyeedka ee hargabka waxaa la sameeyaa sannad kasta iyadoo la raacayo talooyinka markaas jira ee Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) (World Health Organization). Talooyinka waxay tixgelinayaan noocyada fayrasyada hargabka A iyo B ee markaas ku wareegaya adduunka. Tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sarreeya ee halkan lagu sharraxay waxaa uu sidoo kale ka kooban yahay maadooyinka laba fayras oo hargabka nooca A ah (A/H1N1 iyo A/H3N2) iyo laba fayras oo hargabka nooca B ah kuwaas oo isku mar dhici kara. Si kastaba ha ahaatee, xitaa haddii maadooyinka tallaalka aysan isbeddeli lahayn xilli kasta, tallaalka waa in weli la cusboonaysiiyaa maadaama uu raago ugu badnaan ilaa 1 sano.
Tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sareeyo ayaa shati u haysta tallaalka ka hortagga u ah hargabka ee loogu talagalay dadka waaweyn ee da'doodu tahay 60 sano iyo wixii ka weyn. Waxaa la soo saaraa iyadoo la isticmaalayo ukunta digaaga, waxaana la doorbidayaa in lagu duro muruqa (cududa sare ama bowdada dambe) laakiin xaaladaha gaarka ah waxaa lagu duri karaa maqaarka hoostiisa. Tallaalka waa in aan lagu durin agagaarka barida ama neerfaha waaweyn.

Haddii tallaalkan hargabka aha lala bixinayo tallaallo kale, markaas hal tallaal waa in lagu duraa midigta cududa sare ee gacanta, kan kalena dhanka bidix. Tani waxa laga yaabaa inay xoojiso jawaab-celinta nidaamka difaaca jirka ee shakhsiga.

Dhakhtarka tallaalka bixinaya ayaa kaala talin kara arrintan. Kahortagga tallaalku wuxuu bilaabanayaa qiyaastii 2 ilaa 3 toddobaad kadib qaadashada tallaalka.

Yay tahay in la tallaalo?

Guddiga Joogtada ah ee Tallaalka (STIKO) wuxuu ku talinayaa in dhammaan dadka da'doodu tahay 60 sano iyo wixii ka weyn laga tallaalo hargabka, iyadoo la doorbidayo in la isticmaalo tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sareeyo, maadaama ay si gaar ah halis ugu jiraan inay la xanuunsadaan hargabka. Tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sarreeyo wuxuu ka kooban antigiinyo 4 jeer ka badan tallaalada kale ee hargabka caadiga ah wuxuuna difaac wanaagsan siiyaa shakhsiyaadka ku jira kooxda 60 sano jirka ah iyo wixii ka weyn.

Yay tahay inaan la tallaalin?

Qof kasta oo qaba jirro degdeg ah (gaar ahaan caabuq qandho leh) waa in la tallaalaa oo keliya kadib markay soo bogsadaan. Shakhsiyaadka la ildaran xasaasiyad daran oo uga timaada waxyaabaha uu tallaalka ka kooban yahay waa in aan la siin tallaalkan. Tani waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, shakhsiyaadka xasaasiyad daran ka qaba biyaha ukunta digaaga (qeybaha cad ee ukunta).

Dhaqanka kahor iyo kadib qaadashada tallaalka

Dhakhtarka tallaalka bixinaya waa in lagu wargeliyaa kahor tallaalka haddii shakhsiga uu u nugul yahay xasaasiyadaha wareegga dhiigga ama la og yahay inuu yeelanayo xasaasiyad degdeg ah. Shakhsiyaadka waxaa laga yaabaa inay si toos ah u suuxaan kadib (ama xitaa kahor) qaadashada tallaalka sababo la xiriira ka falcelinta irbida lagu durey. Qofka la tallaalayo uma baahna inuu sameeyo taxaddar gaar ah 3da maalmood ee ugu horreeya tallaalka kadib, inkasta oo ay tahay in jimicsiga jirka ee caadiyan ahayn la iska ilaaliyo.

Dareen-celinta xasaasiyadda maxalliga ah iyo kuwa guud ee suurtogalka ah kadib qaadashada tallaalka

Kadib qaadashada tallaalka, guduudashada iyo xanuunka caadiga ah ee goobta la duray, iyo sidoo kale raaxo darro guud, ayaa si isdaba joog ah ugu dhaca (10% ama in ka badan dadka la tallaalay). Xanuunka murqaha iyo madax-xanuunka ayaa sidoo kale aad u badan. Caadi ahaan (1 ilaa in ka yar 10% dadka la tallaalay) barar, adkaanshaha iyo bar guduudan ayaa laga yaabaa inay ka soo baxaan goobta la durey, iyo qarqaryo iyo qandho (37.5 °C iyo ka sareeya) ayaa sidoo kale imaan karta. Bararka qanjirada ee agagaarka goobta la durey ayaa suurtagal ah. Mararka qaarkood (0.1 ilaa in ka yar 1% dadka la tallaalay), waxaa laga yaabaa in goobta la duray cuncun ka dareemaan iyo daal. Dareen-celinadaan waxay guud ahaan soo baxaan 3da maalmood ee ugu horreeya tallaalka waxayna ku baaba’aan 3 maalmood oo kale gudahood. Mararka qaarkood, daciifnimada murqaha iyo daal ayaa la arkaa, iyo sidoo kale astaamo xagga caloosha iyo mindhicirka ah (lallabbo iyo matag, shuban) ayaa la arkaa. Si dhif ah (in ka yar 0.1% ee shakhsiyaadka la tallaalay) daciifnimo ama dawakhsanaan, xanuuno kalagoysyada iyo lugaha ah ayaa soo baxa. Xaalado gaar ah, astaamaha neefsashada (tusaale ahaan, qufac, neefta oo ku qabata, dareenka cakirnaanta cunaha) ama xanuun laabta ah ayaa lagu qeexay.

Dareen-celinadan maxalliga ah ama guud ee kor ku xusan waa qaab jirka uu u muujinayo inuu ka falcelinayo tallaalka. Sida caadiga ah, waa kuwo ku meel gaar ah oo si degdeg ah u baaba’a mana lahan wax cawaaqib.

Macquul miyaa inay dhacaan dhibaatooyin la xiriira tallaalka?

Dhibaatooyinka tallaalku keeno waa cawaaqib aad dhif u ah oo dhaafsiisan heerka caadiga ah ee falcelinta tallaalka, waxaana laga yaabaa inay wax u dhimaan caafimaadka qofka la tallaalay. Kadib qaadashada tallaalka hargabka ee qiyaastiisa/dooskiisa sareeya, falcelinta xasaasiyadeed ee sida; maqaarka (cuncun, finan, furuuruc) iyo kuwa marinnada hawada/cunaha ayaa suurtagal ah. Kiisaska gaar ah kaliya ayaa leh jawaab-celino ka baxsan falcelinta xasaasiyadeed ee caadiga ah kuwaas oo gaara ilaa argagax ayaa la soo sheegay. Marar dhif ah, bararka xidida dhiigga ayaa dhici kara, ama tirada unugyada dhiigga platelet-ka ayaa si ku meel gaar ah u yaraan kara, taasoo keeni karta dhiigbax. Sidoo kale, dhibaatooyinka xagga neerfaha ayaa kaliya si aad naadir u ah loogu soo warbixiyey qoraallada caafimaadka (tusaale, dareemo aan caadi ahayn, caabuqa neerfaha, curyaanimo ku meel gaar ah, qalal ama qandho la'aan) marka loo eego tallaalka.

Talo ku aadan waxyeelada suurtagalka ah ee laga helo dhakhtarka tallaalka bixinaya

Ka sokow buug-yarahan ka kooban macluumaadka, dhakhtarkaaga tallaalka bixinaya ayaa ku siin doona la-talin. Haddii aad la kulanto astaamo tallaalka kadib kuwaas oo ka baxsan falcelinta caadiga ah ee kor lagu sharraxay, dhakhtarka tallaalka, dabcan, sidoo kale, wuxuu diyaar u yahay inuu ku siiyo talo dheeraad ah.

Waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarka tallaalka bixinaya

Daabacaha iyo ©: Deutsches Grünes Kreuz e. V., Marburg
(iyadoo la raacayo talooyinka STIKO ee hadda jira)
Waxaa laga heli karaa dalabka No. 11d laga bilaabo:
DGK Beratung + Vertrieb GmbH
Biegenstraße 6, D - 35037 Marburg
Taleefanka 06421 293-0, Telefakis: 06421 293-1 87

Lambarka Koodhka 2021-10

Tallaalka ka-hortagga ah ee hargabka – iyadoo la isticmaalayo tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sareeyo

Schutzimpfung gegen Influenza – mit Hochdosis-Impfstoff

Magaca

Name

Kahor qaadashada tallaalka, fadlan bixi tafaasiisha shaqsiyeed ee soo socda:

Vor Durchführung der Impfung wird zusätzlich um folgende Angaben gebeten:

1. Qofka la tallaalayo hadda ma caafimaad qabaa?

Haa Maya

1. Ist die zu impfende Person gegenwärtig gesund?

ja nein

2. Bukaanku ma leeyahay xasaasiyad la yaqaan - gaar ahaan qeybta cad ee ukunta digaagga (albumen)?

Haa Maya

Hadday haa tahay, waa maxay

2. Ist bei der Patientin/ dem Patienten eine Allergie – insbesondere gegen Hühnereiweiß – bekannt?

ja nein

wenn ja, welche

3. Qofka la tallaalayo miyuu lahaan jire dareen-celin xasaasiyadeed, qandho badan ama fal-celino kale oo aan caadi ahayn kadib markuu qaatay tallaalo hore?

Haa Maya

3. Traten bei der zu impfenden Person nach einer früheren Impfung allergische Erscheinungen, hohes Fieber oder andere ungewöhnliche Reaktionen auf?

ja nein

Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato tallaallada kahortagga hargabka - ee tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sareeyo - fadlan weydii dhakhtarka tallaalka bixinaya!

Fadlan hore usoo qaado kaarkaaga tallaalka xilliga ballanta tallaalka!

Falls Sie noch mehr über die Schutzimpfung gegen Influenza – mit Hochdosis-Impfstoff – wissen wollen, fragen Sie die Impfärztin / den Impfarzt!

Zum Impftermin bringen Sie bitte das Impfbuch mit!

Xaqiijinta oggolaanshaha

si qofka loo siiyo tallaalka kahortagga hargabka - ee tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sareeyo

(Foomamka koobi leh ayaa sidoo kale diyaar ah si loo siiyo qofka qaadanayo tallaalka, ama wakiilkooda sharciga ah, iyadoo la siinayo koobiga sida waafaqsan sharciga la xiriira xuquuqda bukaanka)

Einverständniserklärung

zur Durchführung der Schutzimpfung gegen Influenza - mit Hochdosis-Impfstoff

(Es stehen auch Formulare mit Durchschlag zur Verfügung, um der zu impfenden Person bzw. der gesetzlichen Vertretungsperson gemäß Patientenrechtegesetz eine Kopie mitgeben zu können.)

Magaca qofka la tallaalayo

Name der zu impfenden Person

taariikhda uu dhashay

geb. am

Waan eegay nuxurada ku qoran xaashida macluumaadka, waxaana sidoo kale aad iila taliyay dhakhtarkayga.

Su'aalo kale ma qabo.

Waxaan oggolahay qaadashada tallaalka la soo jeediyay ee kahortagga hargabka - ee tallaalka qiyaastiisa/dooskiisa sareeyo.

Waan diiday qaadashada tallaalka. Waxaa la ii sheegay cawaaqibta ka dhalan kara diidmadan.

Ich habe den Inhalt des Merkblatts zur Kenntnis genommen und bin von meiner Ärztin / meinem Arzt im Gespräch ausführlich über die Impfung aufgeklärt worden.

Ich habe keine weiteren Fragen.

Ich willige in die vorgeschlagene Impfung gegen Influenza – mit Hochdosisimpfstoff – ein.

Ich lehne die Impfung ab. Über mögliche Nachteile der Ablehnung dieser Impfung wurde ich informiert.

Faallooyin:

Vermerke:

Goobta, Taariikhda:

Ort, Datum:

Saxeexa qofka la tallaalayo
ama wakiilkooda sharciga ah

Unterschrift der zu impfenden Person
bzw. der gesetzlichen Vertretungsperson

Saxeexa dhakhtarka

Unterschrift der Ärztin/ des Arztes